



Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Abril 8, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha  
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)

Ujeedada: Warbixinta sharci-dejinta oo ku saabsan caqabadaha la xiriira adeegyada caafimaadka maskaxda

Sanadkii 2021, Sharci-dejinta Oregon ayaa ansixisay Sharciga Senate-ka 5529 (SB 5529). Sharcigu wuxuu farayaa Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS) iyo Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) in ay:

- Ogaadaan halka dadka reer Oregon ee ay u adeegaan ODDS iyo Dadka waayeelka ah ee qaba Naafanimada (APD) ay kala kulmaan caqabadaha marka ay helayaan adeegyada caafimaadka maskaxda ee la adeegsanayo Medicaid.
- Dejiyaan istiraatiijiyado oo bixiyaan talo soo jeedin la xiriirta sida loo wanaajiyo helitaanka adeegyada loogu talagalay dadka reer Oregon ee labada xaaladood/xanuun qaba 'dually diagnosed' ee adeegyada uga baahan nidaamyo badan.
- Soo sheegaan natiijooyinka la xiriira Golaha Sharci-dejinta ee Febraayo 2022.

## **Hawl wadaagayaasha**

ODDS, APD iyo OHA ayaa la soo shaqeeyay hawl-wadaagayaal kala duwan si macluumaad loogu soo ururiyo warbixitani oo ay ku jiraan dadka helaya adeegyada, qoysaskooda, hay'ada maamulka kiiska, daryeel bixiyayaasha, Kooxda Xasilinta Dhibaatooyinka, Adeegyada Carruurta ee Guriga Dhexdiisa ee Ballaaran iyo khabiirada arrinta laga hadlayo.

Waad ku mahadsan tahay ka qayb qaadashadaada dhanka kooxaha kala duwan. Jawaab celintaadu waxay naga caawisay in aan si fiican u fahamno caqabadaha nidaamsan ee la taaban karo ee dadka reer Oregon la kulmayaan marka ay isku dayayaan in ay helaan adeegyada caafimaadka maskaxda iyo sida caqabadahaasi ugu daran yihiin dadka la kulma caqabado dheeraad ah sida naafanimada iyo baahiyaha helitaanka luqadda.

Jawaab celintaadu waxay saldhig u noqotay istiraatiijiyadaha iyo tallaabooyinka lagu soo jeediyay warbixintii kama dambeysta ahayd, “Warbixintii SB5229: Caqabadaha la xiriira Adeegyada Caafimaadka Maskaxda ee Dadka Waayeelka ah iyo Kuwa naafada ah ka ee Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon iyo Maamulka Caafimaadka Oregon.”

## **Talo soo jeedin**

Warbixinta, ODHS iyo OHA ayaa soo jeedinaya tallaabooyinka soo socda:

- Soo saarka siyaasad gaar ah iyo xoojinta siyaasadaha hadda jira si looga hortaggo kala takoorka dhammaan nidaamyada bixinta daaweynta si loo xaqiijiyo ka mid noqoshada buuxda ee dadka waaweyn iyo dadka qaba naafanimada maskaxda, korriinka iyo jirka. Abuurista habab xaqiijinaya u hoggaansanaanta.
- Dejinta dariiqooyin isgaarsiineed oo xoog leh oo u dhexeeya APD, ODDS, OHA iyo barmaamijyada caafimaadka maskaxda bulshada
- Dejinta habab iyo nidaamyada si loo xaqiijiyo in adeegyada caafimaadka maskaxda loo bixiyo hab qofka ku saleysan oo la heli karo, dhaqan ahaan iyo luqad ahaan ku habboon, oo lagu bixiyo meel dadku ku kalsoon yihiin helitaanka adeegyada.
- Taageerida dadaalada jira si wax looga qabto shaqo yaraanta taagan.
- Dejinta habab si la iskugu dubarido adeegyada loogu talagalay dadka qaba baahiyo adag oo loo fududeeyo wada hadalada maxalliga ah ee ku saabsan isku-dubaridida iyo isdhexgalka.
- La shaqeynta hawl-wadaagayaasha bulshada si loo ogaado istiraatiijiyado si la iskugu duwo maamulada Medicaid ee kala duwan oo loo xaqiijiyo in dadka oo dhan helaan adeegyada iyo taageerada ku habboon iyada oo la adeegsanayo qorsheyn qofka ku saleysan oo buuxinaysa baahiyahooda oo dhan. U soo bandhiga istiraatiijiyado ee loo soo bandhigayo sharci-dejinta si ay tixgelin u siiso 2023.

- Codsiga wada hadal socda oo lala leeyahay sharci-dejinta iyo hawl-wadaagayaasha bulshada oo ku saabsan mudnaansiinta sharciga gobolka ee loogu talagalay adeegyada caafimaadka maskaxda iyo xaddidaadaha ku saabsan APD ee la xiriira u adeegida dadka qaba xanuunka maskaxda.

Warbixintani oo buuxda ayaa la haleyaa [in laga akhristo dhanka internet-ka iyada oo ku qoran Ingiriisi](#). Wixii la xiriira luqadaha kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811.

Shaqaalaha ODDS iyo aniguba waxaanu rajeynaynaa in aanu kula shaqeyno anaga oo fulinayna tallaabooyinkani.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan

bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo  
[www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).